




Tigaad

Curintii iyo ururintii:
Cabdiqani Agaabeeye



Hordhac

Kani waa dhigane aan ku ururiyey suugaan kala duwan oo meelo badan taabaneysa, sida: waano iyo waxsheeg, talo iyo tusaale iyo kuwo kaloo badan. Suugaantaas guud ahaan waa laba cutub:

- **Cutubka koobaad:** waa suugaan aan iskay u curiyey, oo aan lahayn tixraac kale oo laga soo qaatay, waana inta badan.
- **Cutubka labaadna:** waa turjumaad aan ku sameeyey murti iyo gabayo carabi ah.

Waxaan ku magacaabay TIGAAD¹, waxana aan ALLE ka rajaynayaa in uu wixii khayr ah ee ku jira innagu anfaco, wixii gefaf ahna uu innaga cafiyo, isaga oo keli ah ayaan waydiisanayaa talasan iyo tawfiiq, xaggiisa oo keliya ayuu dhammaadka noloshu ahaaday.

Cabdiqani Maxamed Ismaaciil

¹ – TIGAAD: waxa loo adeegsadaa caleenta iyo cawska cusub ee uu roobku soo saaro, (qaamuuska C. Mansuur), waxa lagu maahmaahaa “tigaadi iyadaa laacda”

Qaybta 1aad:

Curin

Xeegaan:

- Haddii aad xayeesh tahay khalqigu kuma xurmeeyaane
- Xeerbeegti goortay rabaan kuma xasuustaane
- Xooliyo nimaan xoog lahayn malaha xeegaane²
- Wax xasaanad loo raadiyaa kii xantoobsada!

Suurad-xumayn:

- Malabkaa anfaaciga lehee Mawle ina siiyey
- Matag weeye maandhow haddii meel xun loo dayo'e
- Xariirtaa macnaha wayn lehee meheradaa taalla
- Dirxi bay kasoo maaxataa maalin iyo layle
- Canbarkaa malyuunka ah haddaan maago sharaftiisa
- Nimirigu musquluhuu dhigaa laga macaashaaye
- Miskigaa khalqigu raadiyee laysku mari waayey
- Waa maal ku taal deeradoo laga he maalaaye
- Adiguna mar baad shay ahayd la iska maydhaaye
- Madheertuna kol bay kuu ahayd Maxamedoow qayde
- Maantana banii'aadamnimo lagugu maamuusye
- Murti iyo af-maalnimo aqoon lagu magaabsiiye
- Ma og tahay waxaad maagto waad marin xumaysaaye
- Magac fiican adigoo hayaad mulac ku sheegtaaye
- Mugga eray habboon raadso waad mahadin doontaa.

² – Xeegaan: xidhiidh is-tixgelin iyo qaddarin leh oo cid ka dhexeeya, (qaamuuska C. Mansuur)

Dhibta dadkeenna haysata:

- Wakhtigaan qasaaraynay bay qolona maaleene
- Markaasay qiyaastii dal iyo qaranba taageene
- Qaar kalena ay meerayaal qalab ku aadeene
- Annagana qardaa noo dhan iyo qaylo iyo buuqe
- Qaad iyo qaxwaa lagu daraa qaaci iyo qiiqe
- Qufac iyo xanuun baa u dheer qaaxadii hore'e
- Quruuntii dhexaan taagannahay qaaraddii Yurube
- Qorshayaal adduun iyo mid kale nooma qaybsana'e
- Qabiilaysigaa nagala wayn qiimihii kale'e
- Qaanuunka aan lagu sargoyn qaaddigaa celine
- Qallacaadda waan wada naqaan qaabka loo dhigo'e
- Kulligeen ba qoodh baynnu nahay aad u qawdhama'e
- Waxa qoriga loo wada sitaa qoyska kula yaale
- Hayeeshee qaniinyada cid kale waan qarracannaaye
- Qaylodhaanna waan yara dirnaa waanan qanacnaaye
- Qaddar EEBBE weeyee sabraa la is qulaanshaaye
- Iyadoo qanjaa nala hayaan qolo muraadnaaye
- Qandhiifada sokeeyaha ayaan qeexi karayaaye
- Qarandidu godkay qodatay baa lagu qabtaa uune
- Qablaydaynnu xidhannaa innana loo qayilayaaye
- Qun yar gala quraac baynnu nahay qoomam loo dubay.

Ilaalinta carrabka:

- Haddaan dhibicdu naxariis lahayn dhiro ma beermeene
- Hadalkii qalbiga laga dhehaa hoos u dhaadhaca'e
- Dhawaaqii dibnaha uun ka yimi dheg uma taagaane
- Carrabkaa dhuryamayee Cabdoow lagu dhawaaqaayo
- Waxa dhegaha laba looga dhigay inaad ku dhawrtaaye
- Dhimbiilaha ka duulaa dibnaha waa dhadhaab culuse
- Dhaaxay dhibaatooyin iyo dhaxal xun reebeene
- Hadal adiga kula dhumuc yar baa dhala masaa'iibe
- Weedhaada dhugo oo ha odhan erayo dheeldheel ah.

Ka faa'idaysiga Ramadaanta:

- Ramadaan badh baa tegay ninkii rubuc u haystoowe
- Wax kastoo la tiriyaa runtii malaha raandhiise
- Rogaal-celinta wuu sii ordaa faraska rooraaye
- Rakaadkana barmiil buu cabbaa ramadka jiilaale
- Bal rukumo intaa kaaga dhiman camal ku raadeeya³

Xifdinta Qur'aanka iyo Sunnada:

- Wax la qaybo oo lagu werdiyo laguna waantoobo
- Oo aan waxyeynkaa ahayn waa wax aan jirine
- Waa wehel walaal kuu ah iyo waalid iyo wiile
- Wuu waardiyeeyaa qofkii waayo laasima!

³ – Xilli ay ahayd badhtankii Ramadaan ayuu ahaa gabaygani

Ducada iyo sida ay noqoto:

- Ma ogtahay ducadu
- Ma dayacanto ee
- Durba waad heshaa
- Ama waa difaac
- Iyo belo dabbaal
- Ama jeer danbiyo
- Daarta aakhiraad
- Ku danaysataa!

Talo-saarashada ALLE:

- Taageeradaadaa Alloow lagu tisqaadaaye
- Cidda aanad tabantaabinayn tamar ma yeeshaane
- Taakulo nimaan kaa helayn toos u socon waaye
- Waa tacab-khasaar ruuxa aad tukubin waydaaye
- Tircin⁴ baannu kaa tuugnay iyo talo samaataa.

Tol wax kuma taro:

- Haddii ay tolnimo wayntohoo lagu tanaadaayo
- Abuu-lahab tigaad weeye iyo tiirka Haashimiye
- Tabbat buu warkiisuna ku yaal taniyo maantiye
- Haddaad toobad-seeg tahay tolnimo kuma tudhaalayso

⁴ – Tircin: nafley si tartiib ah u wadid (qaamuuska C. Mansuur)

Faakihaysi ay naar ku xigi:

- Faakihaysi ay naar ku xigi laguma foognaado
- Caqligii fayooobina xumaha kumaba faanfaano
- Farxaddiisa aakhiro adduun kalama fiicnaado
- Faralkiyo sunnaha layna faray faallo kama keeno
- Faajafaajo iyo ficil qarriban fiidka uma guuxo

Dhibaatadii heshay reer Banii Israa'iil

- Kurbo reer Israa'iil heshaan kuu sharraxayaaye
- Yara kaalay weedh keliya baan kaaga dhigayaaye
- Kibirkii Fircoon waxa ku xigay kadab-go'iisiye
- Kolkay guure uga soo baxeen kolayadii Muuse
- Wuxu soo kadeedmaba badduu keenay socodkiiye
- Koonaha markuu joogsadu kaafirkii yimiye
- Kulankii halkaasuu ka dhacay kama danbayntiye
- Kaarkiyo xanuunkii markii laysla kululaaday
- Ee Kaadirkii meesha yimi kaaji kari waayey
- Ee koran-la-moodkii dhammaan kurusku haysoobay⁵
- Kelyuhuna kadhaa ay gureen hadalka koobnaaday
- Wadnuhuna kobtii uu ku yaal kor uga soo booday
- "Kallaadii"⁶ waxaa xigay baddii kala dillaaceede

⁵ – Hays: meel godan oo kuruska iyo misigta geela u dhexeysa. (qaamuuska C. Mansuur) ama janjeedhka kuruska ku samaysma.

⁶ – Waa tiraabtii nebi Muuse cs kolkii la yidhi “ layna qabay” uu ku tiraabay kuna soo aroortay suuradda al-shucaraa’. 62.

- Kulligood halkaasay socdaal ka anba-qaadeene
- Kabtankii Fircoon baa isana maray kalkiisiiye
- Kas-xumaa waddaye meel fog buu geeyey kuraydiiye
- Karaar-qaaday oo soo xaree idil kornaylkiiye
- Koofiyad-castii oo dhan buu keenay guradiiye
- Bad karaamo kala jeexday buu mooday kala-baydhe
- “Kun”= ahaw bad uun baa la yidhi kurihii taagnaaye
- Isu kaalayuun baa la yidhi karimeheediiye
- Dhammaantood karuurkii wadkaa koonbo loo daraye
- Kumannaan kun baa looga jaray kaadhki aakhiro’e
- Kalabkii Binyaamiin isana waa kurbanayaaye
- Kaar-jebinna heli maayo oo waa la kala goyne
- Kiiskii Fircoon baa u yaal kay hadhaw noqone
- Keenada mar uun buu u dhigan kuu addoonsadaye
- Kabahana mar uun buu u dhiqi koojka Falastiine
- Kasha geli kalaamkii ALLAAN kaaga daabacaye
- Kanshaduna ma dheeree ALLAA lagu kalsoonaan.

Garnaqsi Falastiin iyo Israa’iil

1) Israa'iil:

- Sacabbada haddaan laygu sidin kuma saloosheen
- Sebiyada gantaal lama dheceen saacad joogtaba'e
- San-ka-hadalka waxa iigu wacan saanaddaan helo

2) Falastiin:

- Sareedada halkii lagugu baro waad ku silicdaaye
- Siddahaa u baxa boorsadii inani soohdaaye
- Surin buu ku dhigi reer galbeed subax an dheerayne
- Suxullada dhulkuu kuugu dhufan kii ku saacidaaye
- sacabkii lagu tumi jiraad sahamin doontaaye
- Soofayste nimankii lahaa soodhki saawiraye
- Salka dhigo sidaan yeeli waad sahashanaysaa!

Xuska Eebbe

- Xasuusaha badhkood waa xanuun lala xumaadaaye
- Xummad weeye xiisaha yar ee lala xadroodaaye
- Xuska Eebbe xasillooni baa lagugu xeeraaye
- Xidhiidhkiisa joogtee xurmadi xadhiggi weeyaan

Markaad timaaddo internetka:

- Interneet kolkaad soo gashee furato iimeelka
- Araggaaga eegmada guracan maandhe ka ilaali
- Aflagaaddo yaan lagugu qaban erayo dheeldheela
- Addoomaha Ilaahay qof qudha umal ha gaadhsiinin
- Shinnidiyo duqsiga aadamaha ku ag wareegaaya
- Labaduba itaalyari kasiman eedna kala roone
- Midi waa astaan caafimaad lagu abbaaraaye
- Midna waa agaasime xanuun laga amaahdaaye
- Mid waliba ardaaguu degaa amar u yaallaaye
- Wax intaa la mida meelahaad adigu aaddaaye

- Duqsi haygu noqon Aadanoow uriya boogaa!

Tobanka hore ee dul-xijjah:

- Maalmaha ilaahay faddilay kala ayaan roone
- Maalmaad acmaashaad samayn la anfariirtaaye
- Maalmana awoodaha jidhkay arami gaadhaaye
- Ajarkooda maalmaan la goyn lana ogaanayne
- Maalmaa albaabada jannada uunka loo furiye
- Maalmaa ijaabada ducada lagula eertaaye
- Maalmaa Iblays lagu rogaa oodo dhacameede
- Maalmaa arsaaqdiyo wakhtiga la ajaleeyaaye
- Maalmaa udgoonoow rasuul eraygu gaadhaaye
- Dabadeed salaan iyo ammaan lagu abbaaraaye
- Maalmaa macaash aayo badan Eebbe fidiyaaye
- Markaasay intii qaadataa ku istareexdaaye
- Dabadeed addoomuhu Allaah ka ag dhawaadaane
- Intaas oo wanaagyo ah darbaa loo abaabulaye
- Shanta tiir islaam baa ku jira idil ahaantoode⁷
- Ayaamahakan waa lagu tabcaa inanka seexdoow'e
- Adkaartiyo werdiga Wayne waa lagu ilaashaaye
- Af-xidhkaa sagaaloodna⁸ waa laga adkaadaaye

⁷ – Qofka muslimka ahee tukanaya, sooma sunne ahaan, xajka aada ee sakadana iska bixiya waxa uu kulmin karaa dhammaan tiirarkii waawaynaa, maalmaha kale way kulmi karaan balse xajkaan suuroobayn!

⁸ – Maalinka carafa waxa laga helaa laba sano oo denbi dhaaf ah.

- Dhammaantoodna inad soonto waa lib iyo iimaane
- Hayeeshee abaalkoodu waa ayni goonniyahe
- Nin kastoow itaalkaaga bogo amarku waa kaase

Mawliidka nebiga NNKH:

- Dhalashada Rasuulkeenna
- Qof dhibsaday wanaaggeeda
- isagaa dhibaataysan
- Dhanka kale haddaan eegno
- Ninka dheeha gelinaaya
- Dhaqan aan kitaab sheegin
- Dhaantiyo ciyaar booddo
- Buuq iyo dhawaaq muusig
- Ninka Dhudi la boodaaya
- Ninka dhuuni raacdaynta
- Rabbi ugu dhawaanaaya
- Isagaa dhabbaa seegay
- Isagaa dhaleecaysan
- Isagaa xaqii dhaafay!

Salliga nebigu NNKH waa joogto:

- Sallalaahu nebi Muxammad baa lagu salaamaaye
- Sannad kuwa la sugayoow salligu waa si joogta ah.

Ballankii Alle ee reer Banii Israa'iil:

- Ballan buu la galay EEBBEHEEN banii Israa'iile
- Laba jeer dhulkay bi'inayaan baadil iyo qooqe
- Dabadeedna duul baaxadlaa lagu basbaasayne
- Wuu badbaadin doonaa ALLAAH baacsi dabadiiye
- Baqashada hadday laasimaan barako weeyaane
- Boola-xooftadoodii hadday dibu bilaabaanna
- Kuwo baawarlaa lagu sallidi oo bartii marine
- Dabadeed birtay ka aslayaan boqol kun oo ruux.

Suubbanaha NNKH:

- Suubbanii Ilaah soo diree samada loo qaaday
- Sayidkii saldanaddiisu ay dunida saamaysay
- Sakhigii wax bixin lagala simay sagalka hooraaya
- Saboolnimona aan uga tegayn inu ku sooryeeyo
- Salaadaha dartood mudanihii safantu ay jeexday
- Sabir badanihii loo jirrabay diinta sababteeda
- Saamixidda nebigii yiqiin gacan sarrayntiisa
- Safka hore halyeygii ku jiray seben colaadeedka
- Sooma-jeeste aan abid ka baqin waranka seeraara
- Oo safarro dhaadheer u maray sugidda tawxiidka
- Siirada udgoon mawlihii ku xardhay sooyaalka
- Sameheenna nebigii u galay silic maceeshaadka
- Surimada Iblays uu fadhiyo macallinkii saafay
- Ku salliya rasuulkii khalqigan loo siyaakhadiyey

- Ku Salliya rasuul aan lahayn sadar yar oo ceeb ah
- Ku salliya rasuul nala jeclaa inaynnu soo gaadhno
- Salaan baan hawada kuu marshaa saacadday tahaye
- Jimcahana siyaadaan ku dari saamigaan rabo'e
- Subxaanoow Allahayow kuwii la noqda saaxiibka
- Ee saraha dhaadheer jannada kula sugnaanaaya
- Saatiroow adaa qaadiiree subaxan kaa tuugnay!

Daa'uuska iyo xarragadiisa:

- Loo daa' intii ay lahayd quruxi daa'uuse
- Dakharkaa ku yaallaa isana loogu daw galaye
- Kolka uu dakeeyee xarrago yara dinnaaheeyo
- Damaashaadka uu doonayana dunida gaadhsiiyo
- Daloolkiisa goortuu arkuu kibirka daayaaye
- Mooraal dillaac bay ilmadu daadataa gelin'e
- Wuxu duulo haadkuna libaax daanki wuu geliye
- Laga didi adduunyada raggii daadahayn jiraye
- Dahabkana kuwii soo fagaa maanta deynsada'e
- Daar hadhac leh ruxii dhistee maalmo daawadaba
- Mar uun baa dabayshii wadkiyo iilka loo diriye
- Hadduu mawdku daahana xanuun doorriyaa heliye
- Dawarsade mar uun buu ka bixi diifta uu qabo'e!
- Denbiyada ninkii miistayoow aakhiraa darane
- Dikri iyo waxaa kula gudboon khayr la daa'imo'e
- Waxa loo durbaan tumanayaa degelladeenniiye
- Diyaar uun ahaw meeshatani ma aha deegaan

Tobanka dul-xijjah:

- Rabbi baa ku dhaartoo kuwani ma aha dheel-dheele
- Dharaaraha adduunyada lawaa' maalmo loo dhigo'e
- Dhugo hadalka yaan lagugu odhan dhooohanaa tahaye!
- Ku dhaqaaqa khayrkoodu waa dheemman iyo luule
- Ka dheeraada dhacadiidsigiyo dhuuni daba yaaca
- Dhafarkiyo laqwigu joojiyoo hadalladiin dhawra
- Ku dhaygaga Qur'aankiyo werdigu waa dhambaal culuse
- Dhaayaha ku jeedaaliyoo weedh kastaba dhuuxa
- Dhegahana sameecado Qur'aan socod kusii dhaafa
- Ninkii soon ku dhaabbaday ka durug dhamacda naareede
- Dhimbiilaha cadaabtaa ka kulul dhereg la'aantaase
- Dhammaantoodba soon, waxaad ku mudan saraha dhaadheere
- Ama dhawr ayaamood af-xidho dhabar adayggaaga
- Dhulka aad maraysana ka qaad dhagaxa waa khayr'e
- Ducadana ku dhaashada wallee dhaanki waa yimiye
- Wanaaggooda kuumaan dhawayn kumana dhaadsiine¹
- Dhab ahaan waxay mudan yihiin dhurasho khayraade
- Dhumucdiyo ujeeddada ka gunud hadalkan aan dhoobay
- Dabadeedna dhiishaada culo dhaqayo kaad maasho!⁹

⁹ – Meeris baa jiray kan oo kale ah oo uu lahaa Cumar Australia oo ahaa "Ammaantiisa kuumaan dhammayn kumana dheeraane" oo uu geela kaga warramayey, kanina waa uu kasoo dhimbiil qaatay

Rag hagaasay:

- Way wada hagaaseen raggii hibadu saarnayde
- Hadallada haweenkay wershaan hanaddadiinniiye
- In la hooyo uun baa u dhiman hebel ku sheeggiye
- U hagooga way mudan yihiin inay hullaabtaane!

Silsiladda Fiqiga Shaaficiyada:

- Mad-habteenna Shaaficiyadaan kuu mutuxayaaye
- Marjacyada aqoontaan rabaa inaad mushaaxdaaye
- Mafaatiixdan qabo waa intaad marin-habaabtaaye
- Marka hore Safiiniyo Taqriib midho kasoo qaata
- Qaasimi ha moogaan wallee malaha deel-qaafe
- Cumdahana mudkiyo moolka iyo muruqa soo taabta
- Murtiyahanku Subadkuu lahaa malabsadoo ruuga
- Tanbiihaa macluumaadka badan uunka maqashiye
- Manhajkiyo Minhaajkaa marsada maalmo tiro beela
- Irshaadkuu macneeyaa ninkii Mawlaheen baraye
- Muqnigiyo Tuxfaha iyo Kansiga sharraxyo meeleea
- Umkii Muxammad Shaafici lahaa madasha soo jooja
- Mukhtsar Muani waa muhiim inaad muquurtaaye
- Majmuucana la noolooow ustaad miiggaan baa qoraye
- Basiidkaa macaanida ku jira macallin waydiiya
- Rawdada macaankeeda badan maanka ka ogaada
- Muftibuu noqdaa ruux kuwaa maal ku bixiyaaye

- Dabadeed markaasuu Allaah mahadiyaa goore
- Ka maxaafso waataad beryahan kala maqnaydeene
- Ama maalintii soo gashaba muran lasoo booda
- Midkanaa rajaxan kaa kalaa ila qurxoon miisa
- Macquul maaha Shaaficiyaduna marin la taagnaada
- Idinkoo mas'alo aan saxayn maagis ka adkaada
- Maanigaa mubtadic soo dhawayn nagula meeraysta
- Ashaaciro ayaad magansateen nagaga maadaysta
- Noo curiya maahmaahyo iyo hadal masaabiir ah
- Manka iyo magoolkana hadhaw keenna mudan eega!

Xiisaha xajka:

- Rabbiyoow inaan soo xajaan xeeladeed galaye
- Xiisuhu wuxuu ii hayaa xaramki waynaaye
- Xakamaha kuwii noo hayaa xeer ku qaadacaye
- Xannibaad ayay nagu rideen xaal ka waajibaye
- Xayiraadda aan qabo adaan xogi ku seegnayne
- Goortaan xujaajtaa arkaa laygu soo xayane
- Xiskaygaan dawaaf kaga jiraa saan xaqiiqsadaye
- Xuduudaha waxaan marahayaa Mina xageediiye
- Goortaan xasuusteed galay xididdo boodaane
- Xakiimoow talaan kugu xawilay xagatay laabtay'e
- Malaa'iigta xooggani kolay ila xawaarayso
- Koluu haadka xiimaa hawada ila xadaafiir
- Koluu xuudka badahaa fadhiya ila xagaafeeyo
- Xisaabtiisa ii sahal adaa xaaladday garane

- Xurmo iyo wanaag aniga oo la igu xayndaabay
- Oo aan xabaashiyo qabriga camal xun ii oollin
- Xaasha'e anoo aan aqoon xaniyo deel-qaafba
- Walaw ay xarriijimo ku tahay xaganin iinsaanba
- Anigoo xariiroon lahayn xaraf yar oo ceeb ah
- Xoolaha islaamkana anoon barannin xaaraanta
- Anigoo xalaal-miiradoon xadhigga sii daynin
- Xerownimada anigoon u arag xaajo laga faano
- Anigoo xayaata adduun xumaha yaal xooray
- Xilligaa Allahayoow wedkani ima gefee xaadir!
- Xuural-caynta qiimaha lehee xaadda dabanaysa
- Iyo xabag-barsheedkiyo nimcada nebiga xawdkiiisa
- Xaddiga weelka yaallana sidii xidigo aad moodi
- Allahayoow ducada xoojiyee ii xasili guusha!

Yaad la saaxiibi:

- Ciyaal-suuqa lama raadsadiyo waalid caasiga'e
- Culimada cilmiga raacataa lala caweeyaaye
- Cabsi Eebbe ruuxaan lahayn caajis laga qaadye
- Alle caabudkaa laga bartaa camallo waawayn

Dhibta taal qiyaahamaha:

- Qiyaamaha walaal iyo ma jiro xoolo qiimo lehe

- Qabashada qabriga waxaad geftaa qosolladaadiye
- Qunyar soco, qasaareba jannada waa adoo qadaye
- Qafladdiyo xisaab-yaridu waa qalabka shaydaane
- Qaraamiga qushuuc lagama helo qararac mooyaane
- Qaraw iyo waxaa laga dhaxlaa hadal quraafaade
- Qur'aankaa ka mudan adiga oo qaafka laasima'e
- Qalbigaaga noolee, xubnuhu qolof ma dhaamaan!

Nebi Muxammad (NNKH)

- May qabanin labadaa indhood ruux ka qaab wacane
- May qaadin hooyona cid ay qurux wadaagaane
- Dhalashada Quraysh buu ahaa qoodha Haashimiye
- Qabna waxa ku filan wuxu ahaa qoladi fiicnayde
- Quraankuna wuxu ugu wan-qalay waa addoon qudha'e
- Hayeeshee rasuul qiimalaan qodob ku dhaafayne
- Quwadaha Ilaah muu lahayn Maxamed qayr-sheege
- Qaddarkiisa lama dhaafin karo maaha quudhsiguye
- Isagaa qawaaniinta qaar noogu qoray looxe
- Qaniimayso caawana salliga yaan lagaa qadin

Heesaha:

- Markay naftu qiiq dareento
- Qarracantee aad wareerto
- Qur'aanka u daar, qabooji
- Qaafkiyo Yaasiinka raadso

- Bogagga Qaafir ugu danbeeya
- Qushuuc, niyad-sami ku qaabil
- Qisada Nebi Yuusuf dheeho
- Kolkaad yar muqurto qawlkan
- Jidhkiyo ruuxdaa qunuudi
- Qalbiga daxal baa ka maydhmi
- Qanaaco Allaad dareemi.

- Kolkaad nafta quudin maandhe
- Quraac iyo qado u dooni
- Cashada u qorshayn casuumad
- Qiyaas qalbigaa xuquuq leh
- U baahan qadhaab la siiyo
- Dikriga ku qaboo waraabi
- Ku qoo aayaadka Eebbe.

- Qaraami ninkii dhegaysta
- Intuu qiirada jabbaanta
- La qayliyo qoom la aasay
- Intuu xiddigaha qofeeyo
- Xaddiyo Qamar kuugu sheego
- Intuu qorrax kuu siraado
- Dhulkana qandaraas ku doono
- Misana qaarado yagleelo
- Kolkuu qaddarkaa dhammeeyo

- Muxuu istafiiday Qayrre?
- Dhegtiyo Isha dhawro Qaasim
- Nimcada Rabbi kuu qorsheeyey
- Kuwaa jira loo qadhiidhay
- Kuwaa jira qayb la siiyay
- Darbaa qaday oon midh haysan!.
- Haddaad qurux heeso moodday
- Adiyo qasadkaaga weeye
- Qiyaamena waa halkiiye
- Ku qoro buug aan lumaynin
- Qoraalka far wayn ku daabac
- Qalinka dhawr jeer ku muuji.

Salaadda habeenkii:

- Salaantiyo sankiyo sacabbadaa laga sujuudaaye
- Ruuggiyo faraa suulashaa lagu salaaxaaye
- Markaasaa Subxaan laga baryaa sara firdawsaade
- Saqda dhexe habeenkii ayaa lala siraystaaye
- Suuradaha dhaadheer ayaa lagu sargooyaaye
- Salligana markaasaa gadaal lagaga soohaaye
- Sareedada halkaasaad ka heli inanka seexdoow

Aayadaha faatixada:

- Xasan iyo Xuseen baa ku lumay xeerka faataxa'e
- Xulafada Jamaahiirtu way wada xisaabsheene
- Todobay kusoo xooriyeen Xarafyadeediiye
- Xujadana waxay uga dhigeen waa xadiis sugane
- Xagga loo bataa baan rabaa inaan u xaytaaye
- Sidaasaan tixaa ugu xardhaa xaajadaan rabo'e
- Xakamaha markaan sudho ayuu farasku xiimaa!¹⁰

Maanshiilka maaga diinta iyo culimada:

- Marka hore Allaan magansadee magacii aan sheego
- Mudanii rasuulkana salaan Maxamed gaadhsiiyo
- Culimada raggaa maagayana mid aan dareensiyo
- Maanshiilka soo badanayana balaan u maansoodo

BOQORKA:

- Midda hore Allaan mahadiyoo Maaliggay mudane
- Mirir kaliya kama maarannoo waana loo marage
- Qaanuun mug wayn buu arlada noogu maamulaye
- Mabda' noloshu kama maarantoo ma aha dheel-dheelee
- Halkuu mara na leeyahay ayaa lagu mabsuudaaye
- Mu'min diidmo kama soo fushiyo hadallo maadayse
- Mar qudhay dhammaantood dhehaan "maqalnay Waynoow'e"

¹⁰ – Meerisyadani waxay sheegayaan tirada aayadaha suuradda Faatixada oo culimada badankoodu 7 ku sheegeen, balse uu Xasan AlBasri ka dhigay 8, halka Xuseen AlJucfi isna uu ka dhigay 6.

- 
- 
- Miyeynaan islaam wada ahayn Mawle garanaaya!
 - Mise maafiyaan noqonnay iyo maxasta shaydaanka!
 - **CULIMADA:**
 - Mashaayiikhda ragga maagayana mid aan dareensiyo
 - Culimadu milgay leedihiyo mud iyo miisaane
 - Masaa'iisha diintay na bari maalin iyo layle
 - Munkarkana jidkiisay wallee marin yaqaannaane
 - Maal kama helaan waanaday innagu miisaane
 - Macbuudkay kawada doonayaan maxabbadiisiye
 - Maamuuska ay mudanyihiin maandhe may heline

MAANSHIILKA:

- Maanshiilka soo badanayana balaan u maansoodo
 - Maahmaah hadday garanayaan balaan u meeleeoyo
 - Marti way xishootaa markay madasha joogaane
 - Madfacaad ganaysaa kolbuu kugu maqnaadaaye
 - Afka aanad maarayn karayn meel xun waw halise
 - Musbaarkaan dubbaha lagu adkayn malaha raandhiise
 - Midhihii Iblays beeray way wada magooleene
 - Muska waxaad u weegaaraysaan macallinkiinniye
 - Maankiinna waxaad uga dhiseen mawlac uu dego'e
 - Maskaxdiinna isagaa mulkiyey oo mankii dhigaye
 - Hayeeshee marbuu idinku odhan "maanigaa idhiye"
 - Mawjadaha guuxaaya wuu idinku maanshayne
 - U mashxarada idinkaa la degay moolka jahannama'e
- 
- 

Dareen-cabbir:

- Hareeraha haddaan eego saw hilib ma yaalyaallo
- Hebel iyo hebloo miidhan saw haadku fagi maayo
- Saw hooyo uurliyo dhallaan holocu muu leefin
- Saw hanadki aan eegan jiray igama hooseeyo
- Hantidaan lahaan jiray iyana horror ma qiiqaabin
- "Hooggayeey" haddaan odhan lahaa hadal nin wayn maaha
- Haatana haddaan aammusana layga hadhi maayo
- Sawir-qaade hawshaada wado horumar weeyaane
- Haddii kale xaggaa iiga durug heeryo lagu saarye!¹¹

Iimaanka:

- Wax ilaahay lagu aamminaa kaama awdana'e
- Adigaa inkaaraha adduun kugu albaabmeene
- Aayaadka Eebbaa qalbigu ku istareexaaye
- Cir ballaadhan arad baaxad wayn, badaha aageenna
- Buuraha awoodaha lihiyo bananka aan joogno
- dabaylahan ayaantay dhacaan la ashqaraaraayo
- Astaan buu Ilaah nooga dhigay lagu islaamaaye
- Ashahaado tawxiidku waa aayatiin dhabahe

¹¹ – Waa erayo dareen-hadal ah oo aan ka sameeyey sawir laga qaaday oday dhex-fadhiya meel uu qarax ka dhacay magaalada Muqdisho oo dhabannada haysta!.

Talo iyo tusaaleyn:

1) Hubsiiimo:

- Wiil yohow jibbaysani
- Jidka aad maraysaa
- Jannadii ma gaadhaa!
- Mise waa jardiimada
- Jarka naarta marayee
- Ku aroora Jahannama !
- Jaalloow i maqaloo
- Iga qoro jawaabaha
- Aan kuu jumleeyee.

2) Tuko

- Marka hore Jihada eeg
- Sara joogso oo bood
- Dhulka dhigo jilbaha oo
- Shanta jeer salaadaha
- Wakhtigooda joogtee
- Jamacana ha moogaan.

3) Soon

- Bisha Soon jidiinkiyo
- Waxa jebiya soonkiyo
- Hadallada jikaarka ah
- ka joogsoo ka dheeroow.

4) Sadaqo

- Jeebka gacanta geliyoo
- jeex timira kay tahay

- Jeedaali baahane
- Iyo Jeess agoomo ah.

5) Deriska:

- Xaqa jaarku leeyahay
- Jibriil baa adkeeyee
- La jecloow wanaaggoo
- Ka jir weedh xumaaneed.

6) Aqoon

- Jahli waa dhibaatee
- Yaanu jaanis kaa tegin
- Jidhaamada aqoontiyo
- Jeegaanta roobaad
- Jabadkeeda weegaar.

7) Guurka:

- Kelinnimadu waa jabe
- Gabdhahaa jilbaabada
- Rabbigay ku jookaray
- Ka xul Johoradaadi.

8) Xuska ALLE:

- Xuska Eebbe jaangoo'
- Jilci laabtada oo qoo'
- Naftu yay ku jiidane
- La jihaad walaaloow
- Janankii iblayskana
- Meel adag ku jeebbee
- Jeenni-qaaro oo toos
- Samahana la jaan-qaad.

Sacabbadaada ayaad biyo kaga dheregtaa:

- Inta hoo la leeyahay qofnaba haakah odhan waaye
- Markaad adigu haaneeddo baad talo haleeshaaye
- Haddaad keenta uun heli taqaan horumar waa been!

Ramadaan dhammaataye:

- Ramadaan dhammaataye
- Waxa dhiman rarkeedii
- Rabbigii abuuraa
- Weli loo rukuucan
- Rukumoo hasii dayn

- Roobka meel ku hooree
- Laga waayo raad-raac
- Hadda malaha raandhiis.

- Ninka raasa-maal hela
- Balse aan rog-roginnee
- ku radeema ooddee
- Ribxi aan ka raacdayn
- Isna mala raandhiis

- Rafaad baa danbeeyoo
- Waxa lagu rogmanayaa

- Waa riximka naartoo
- Ruuxa ugu cadaab yari
- Waa oday rag dhaamoo
- Raysmo-gaadho loo dhigay
- Rarankii cadaabtee
- Axadkii la ruubaa
- Ruuxdu dhaafsi maysee
- waxa uu ku reemaa
- Allaw rumayda iga goo'
- Raaxo aan dareemee
- Malag loo rabbeeyoo
- Raxmad aan lahaynoo
- Aan rabin warkiisaa
- Jawaab raagtay dabadeed
- Odhan waa "rugtaadee
- Ku rakaado weligaa”

Alle ka cabso:

- Kolka aad cidlootee adoo kaliya meel joogto
- Rabbigii karaamada lahaa ka cabso maandhoow

Ragga dumarkooda bannaanka keena:

- Middii Eebbahay kuu qoriyo midigta jeexaaga
- Marwadaada maandhoow maxaad nagaga maaweelin
- Ma markhaatibaad nooga dhigi madaxa ay qaawin
- Mise way qurxoontahay ayaad marag u doondooni
- Ma macaanka noloshaa halkaa idinla meeraystay
- Mise maankibaa idinka tegay malaha waa yaabe
- Ma moodeelka Yurub baa sidaa maanta yidhi yeela
- Mise waa magaalkiyo casriga muranku waa ceebe
- Ma Muuqaal si loo daawadaa meel xun idin geeyey
- Mise maalkibaa goobtan galay meheradaa yaallay
- Ma maqline maxaad igu dhehdeen maafish baa dhacaye
- Moojiye maxaan idinka qori maba hadlaysaane

Dacwaddii neb Nuux cs:

- Kun sanuu dhawaaqaayey Nuux kamana daalayne
- Konton baa ka dhiman tirada uu ka hadlay tawxiide
- kor iyo hoosba waa kii lahaa: kaalayaan idhiye
- Karaamuu la doonaayayee waanay kasahayne
- Kolkii Eebbe maansheeyey bay kibirka daayeene
- Kabtankii Fircoon baa isana koray Israa'iile
- Koramuu ka dhigay odayadii kaadirka ahaaye
- Ka joog baa la yidhi maalintuu kariyey reerkaase
- Markii Eebbe kululeeyey buu qiray karaankiiye
- Keligii inuu aamminuu sheegay kaasina'e

- Balse waa kalaam aan lahayn kaalin qiimo lehe
- Ninkii kurusku waynaadayee xaq ka koodaaba
- Karuurkiisa goortuu dhamaa laga kexeeyaaye
- Kama' kama ahee Eebbahay waw kal tiriyaaye
- Waa loo yar kaadshaa xumaha kolay ka laabtaan

Colaadda sokeeye:

- Soofaha dulmiga meel fog baa lagu salaaxaaye
- Sebenkeennu soomaali buu sarar u yeeshaaye
- Suug kuma riddaan soohdintuu saancadduu dego'e
- Sinjigiinna keliyaad runtii siri taqaannaane
- Silicaasi Soomaali waa saami loo qoray

Sawir iyo xikmad:

- Xikmaddaan sawirkaaga
- Iyo suulka saxeexa
- Saddexdaasi ku oollin
- Maba kaa soconayso!
- Adigaagan sameeyoow
- Waa sidaad u malaysay!¹²

¹² – Waxa laga hadlayaa dadka hadallada murtida ah haddii ay soo qoraan sawirkooda ku lifaaqa!

Difaaca Rasuulka Sallalaahu calayhi wasallam:

- Nacaskii hadlaba ha iska lulo nebigi waynaaye
- Nacallaa ku yaal waxa ku filan holoca naareede
- Nuur iyo wuxuu noo ahaa Maxamed neecaw'e
- Nin kastoo abbaaroow adaa luray naftaadiye
- Naxli baa ka keenaye nijaas nama hawaysteene
- Nabsi baa heloo kuma ledaan nabad la taamaaye
- Nukliyeer mar uun baa la heli nadiga shaabuuge
- Markaasaynnu neefkaa ku dhigi nabarro waawayne
- Iska neefso waxa kaaga dhiman nolosha maalmuune¹³

Xerow:

- Waa loo xeroobaa walaal xarafka diimeede
- Xarragiyo waxaa laga tagaa xilalka qaarkoode
- Waa loo xaaraashaa waxaad xoolo leedahay

Tixdii Bayaan:

- 1-Bismillaahi waa xaajo diin laga bilaabaaye
- 2-Waa belo xijaab oo ma jiro baadil karayaaye
- 3-Burjigiisu waa dayr bir oon cidi ka boodayne
- 4-Nin Ilaah bartaa waa ka hodan baahi aadame'e
- 5-Al-Baqrana nin joogteeyey waa barako dhaafaaye
- 6-Bukhaariga ninkii daalacdaa waa barbaar adage

¹³ – Waxa ay ka hadlayaan meerisyadani nin Nebiga aflagaadeeyey NNKH.

- 7-(Bayjuurigaa laga dayaa baabka shaaficiye)¹⁴
- 8-Baydkaana waxa sheegay waa buunigii hore'e
- 9-Baarri waalid ruuxii noqdaa beer jannuu helaye
- 10-Waa baalka aadmigu ku maro badaha waawayne
- 11-Bushaariyo bil-khayr buu ka heli beerka uu dhalo'e.
- 12-Culimada bayaankood ma yara boogna may dhayine
- 13-Balse waa qiyaas Eebbahay buug ku daabacaye
- 14-Bulshadii dhegaha awdatee xaq ka baydhaaba
- 15-Bahdil iyo waxay mudanayaan gaal la baashiro'e
- 16-Baydhan bay ka doon-doonayaan baawar iyo xooge
- 17-Waxay daba biqleeyaanba waa shilinka Baariise.
- 18-Barta guusha waxa loo maraa bohola waawayne
- 19-Buur baa la korayaa ban iyo duni bah-gooyaade
- 20-Bilaash laysku siin waa' lib iyo billad la taamaaye
- 21-Waxa laysu baabiinayaa yaan lagaa badine
- 22-Ninkaan boodin ee boodhka aan bidix ku sii biinin
- 23-Midigtana billaawaha ku qaban socodna aan biirin
- 24-Degta aan kitaab boorso wayn garab ku sii baacin
- 25-Banii aadam waa baahanee Boqorka aan tuugin
- 26-Dadku waa intii badar cuntee dalagga aan beerin
- 27-Bashar waa wax daan-daansade'e danab ku bootaynin
- 28-Baaruudda saaruukh wax guba beledka aan keenin
- 29-Abidkii wuxuun buu baryaa wiil bataatacaye
- 30-In uu biiyo in uu baahi-tiro in uu ku biiteeyo
- 31-In uu boqonta gooyiyo in uu "ba'ay" ka yeedhsiiyo

¹⁴ – Tudacan qoolka aan sudhay, ee quruxda badan waan soo xigtay. cid leh se garan maayo.

- 32-In uu beedka kaga joogsadiyo in uu basbaaseeyo
- 33-In uu balag u yeeliyo in uu baqal u heenseeyo
- 34- Bashaarkaa sidiisii in uu shacab ku biimeeyo
- 35-Bal maxaa ka faa'ido ah gaal barannay waagiye!
- 36-Hadday dunida ugu tiro bateen ma aha buureeye
- 37-Hadday kaa bidhaan wacan yihiina maaha sii bila'e
- 38-Sagaalkii bilood waxa u dheer bilashadoodiye
- 39-Waxay kuu bisleeyaan cuntada laga bacaystaaye
- 40-Shaahay bineeyaan adaa aad u baayaca'e
- 41-Bur daqiiqa lama soo baxdaan boorash loo bogo'e
- 42-Wuxuun baad la bood-boodaysaan buulkanaan degaye
- 43-Beretama rag waa kuwa kacee booba socodkiiye
- 44-Ama beenta aad sheegaysaan boqol kusii biirsha
- 45-Dabadeed bartaas uun fadhiya barako weeyaane.

Ilaalinta carrabka:

- ■Kaftan badan kufrina waa dhalaa waanad kohataaye
- ■Weedhaan karaamada lahayn kama xishootaane
- ■Karkaarkay ku waydaarisaa kelimad baydhaaye
- ■Erey kooban iyo waxa habboon kaadsi loo dheho'e
- ■Kashaa lagu hufaa hadal kastood keen is leedahaye
- ■Waa loo kal tiriya murtidu yaanay kaa lumine
- ■Ardaygii Ba' kari waayey ee kaafku ku adkaaday
- ■Kadeed weeye inaad dhaafisaa kaalintaa hore'e
- ■Korankii la raray ee tankii laga korraysiiyey
- ■Kolka uu hinqado wuxu ka jabi adhaxda Kaarshoow'e

- ■Wuu kurus xumaan heeryaduna way ka qubataaye
- ■Mid waliba karaankii u sheeg karahu waa ceebe!

Dardaarankii Luqmaan:

- Codkar buu ahaa Aw Luqmaan caalim gaammuraye
- Casharraa ka hadhay Aadamuhu ku cibro-qaataaye
- Curadkiisa weedhuu ku yidhi cayn aan ka higgaadsho
- Shirkiguu ciwaan uga dhigiyo caynadduu yahaye
- Cibaadayso buu yidhi ALLAA laga cabsoodaaye
- Hal cabbaar ah baa lagu hakaday xaajadaa culuse
- Cadka waalidiintaa la baray idil carruuraaye
- Hadduu EEBBE caasiyo samaa lagula ceeshaaye
- Mahadcelin carfoon baa halkaa loo cimaamadaaye
- Qudhaanjo cas kolay tahay khalqiga waa la soo celine
- La cajaba awood xooggan baa curisay noolaaye
- Wuxu yidhi wanaag cududda sii xumana ceebeeye
- Sabir iyo salaad loo cuskado waa kusii culaye
- Dhulkoo caadi loo maro dadkoon la isu coofaarin
- Socod caafimaad qaba adoon kibir la ciirciirin
- Ciyaartiyo iswaalwaalka waa lagu cadaabmaaye
- Cagta dhigo isqaadqaadku waa camalka shaydaane
- Caalamkoo dhan waa karahsadaa cida dameeraaye
- Codka gaabi waa kuu xumaan inaad cabaaddaaye
- Caku! talada meeleeaya waa lagu cisoobaa!

Cadaaladda Alle:

- Haddaan dunidan xaalkeedu ba'ay la is xabaalaynin
- Oo aan xabbaadh iyo dulmiga xeerar daba oollin
- Haddaan nimanka xaaraanta cunay laga la xaajoonin
- Oo aan Ilaah Xaakimihi ina xisaabaynin
- Oo aan xaggii aakhirana xolod ka qiiqaabin
- Jannadana xariir lagu gogleen lana xayeysiinin
- Xayaataduba may yeelateen xiisa goonniyahe
- Xumahana cid may xeeriseen mana xishooteene
- Xalaal-miirad iyo xoolo wacan laguma xiiqeene
- Xayawaanka oo kale cidiba kama xurmowdeene
- Xaaskaaga iyo hooyadaa xad uma yaalleen!

Qaybta 2aad:

TURJUMAAD

عَطَسَ الْغَنِيُّ فَقَالَ مِمَّنْ حَوْلَهُ..... رَحِمَ إِلَهُ حَبِيبِنَا وَأَخَانَا

وَأَتَى الْفَقِيرُ بَعِطْسَةً فَتَأَفَّقُوا..... مَنْ ذَا الَّذِي بِرُكَامِهِ آذَانَا ؟

Hindhisada ninkii ladan

Waa haybad goonniya

Hambalyaanu mudan yahay

Haddii uu nin baahani

{Hicishaa} yidhaahdana

Hadalkiinnu wuxu yahay:

"Nagaddaa habaar-qabe

Hargabkiyo dhibaataada!"

Hawraartu waxay tahay

Ninka hodana taageer

Ninka hadhayna yeelkii

فَإِنْ تَفَقَّ الْأَنَامَ وَأَنْتَ مِنْهُمْ..... فَإِنَّ الْمِسْكَ بَعْضُ دَمِ الْغَزَالِ

(المتنبّي)

Dadkoo idil haddaan adiga gaar kaaga darajeeyey

Ma ogtahay miskiga diibku waa dhiigga deerada'e

انقلب السحر على الساحر:

Sixirkuba marbuu kii lahaa sare u raacaaye

Sun ninkii walaaqana mar bay tiisa sababtaaye

Seedaha marbay kaa jartaa seefta aad tumi!

Qasiidada Al-Jurjaaniyah:

١ - يَقُولُونَ لِي فِيكَ انْقِبَاضٌ وَإِنَّمَا *** رَأَوْا رَجُلًا عَنْ مَوْفِ الدَّلِّ أَحْجَمًا

Nin qaloonayey igu tuhmeen gacalka qaarkoode

Qodobkay saluugeenna waa quudhsigaan nacaye

٢ - أَرَى النَّاسَ مَنْ دَانَاهُمْ هَانَ عِنْدَهُمْ * وَمَنْ أَكْرَمَتْهُ عِزُّهُ النَّفْسِ أَكْرَمًا

Qaraabaysi ruuxii ka raba qolo la maamuusay

Iyo quud midkii doonayaba qiimihii dhimaye

Qab ninkii leh uun bay khalqigu sare u qaadaan

٣ - وَلَمْ أَقْضِ حَقَّ الْعِلْمِ إِنْ كَانَ كُُلَّمَا *** بَدَا طَمَعٌ صَيَّرْتُهُ لِي سُلَمًا

Haddaan damac quraac iyo cashiyo qado ku doondoono

Qaddarkii cilmigu yeelan jiray qaybna maan gudan!

٤ - وَمَا زِلْتُ مُنْحَازًا بَعْرَضِي جَانِبًا * مِنَ الدَّلِّ أَعْتَدُ الصِّيَانَةَ مَغْنَمًا

Sharaftayda qaamuuska ceeb laygu qori maaayo

Qaddar Eebbe mooyee dheg-xumo laygu qaban maayo

٥ - إذا قيل: هذا منهلٌ قلتُ قد أرى*** ولكنَّ نفسَ الحرِّ تحتملُ الظَّما

Bal qudhqudhi haddii lay yidhaah qabada ceegaagta

Qaditaanku waa xeer-gobeed qudhunse waa ceeb

٦ - أنزَّهها عن بعضِ ما لا يشينُها*** مخافةً أقوالِ العدا فيم أو لما

Qun yar baan tallaabada rogaa qoobka aan dhigo'e

Qodaxdaan ka baydhaa si aan laygu qawdhamin

٧ - فأصبح عن عيبِ اللئيم مسلماً*** وقد رحتُ في نفسِ الكريمِ مُعظَّما

Dabadeedna qaayaan ka helay laabta qaariga'e

Ruuxii qallooc ila damcana quusay waa' hore'e

٨ - وإني إذا ما فاتني الأمرُ لم أبت*** أقلبُ كفي إنره متندِّما

Qorshahay hadduu foolxumiyo qaabab kale yeesho

Qamuunyeysan maayee Rabbaan qayr ka sugayaa!

٩ - ولكنه إن جاء عفواً قبلته*** وإن مال لم أتبعه هلاً وليتما

Hadday qoolka iisoo gashana waa qaniimaday'e

Qaar kale hadday booqatana waa qanaacaday'e

١٠ - وأقبضُ خطوي عن حُطوطٍ كثيرةٍ*** إذا لم أنلها وافر العرضِ مُكرما

Ma qamaamo goortay dadkuba wada qadhaabtaane

Ma qaddimo naftay meesha aan laygu qaabiline

١١ - وأكرمُ نفسي أن أضاحك عابساً*** وأن أتلقَّى بالمديحِ مُدَمِّما

Ma habboona inaan ruux qarriban qosolka deegsiyo

Ma qummanase ruux aan mudnayn inaan la qiirodo

١٢ -وَكَمْ طَالِبٍ رَقِيَ بِنِعْمَاهُ لَمْ يَصِلْ *** إِلَيْهِ وَإِنْ كَانَ الرَّئِيسَ الْمُعْظَمًا

Qoortayda immisaa nimciyo qarash ku doondoona

Balse qiray itaalyari markaan tooda qaaddacay

١٣ -وَكَمْ نِعْمَةٌ كَانَتْ عَلَى الْحَرِّ نِقْمَةً *** وَكَمْ مَغْنَمٌ يَعْتَدُهُ الْحَرُّ مَغْرَمًا

Immisaa qalfoof kula wacnaa qiiq kasoo baxay

Immisaa qasnado dheemman ahi qarax la moodaa!

١٤ -وَلَمْ أَبْتَدِلْ فِي خِدْمَةِ الْعِلْمِ مُهْجَتِي *** لِأُحْدِمَ مَنْ لَاقَيْتُ لَكِنْ لِأُحْدِمَا

Qasdigaygu waa inuu cilmiga qaran ku taamaaye

Qawsaar inaan kuu noqdaa qadaf xun weeyaane

١٥ -أَشَقَى بِهِ غَرْسًا وَأَجْنِيهِ ذِلَّةٌ *** إِذِنْ فَاتَّبَعَ الْجَهْلُ قَدْ كَانَ أَحْزَمًا

Cilmigaan qadoodiga u maray qorista miiddiisa

Qarda-xoogsadaan ahay hadduu qaadhay tacabkiiye

Qafladdiyo jahligu saw kolkaa ilama qiimaysna!

١٦ -وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ الْعِلْمِ صَانُوهُ صَانَهُمْ *** وَلَوْ عَظَّمُوهُ فِي النُّفُوسِ لَعُظِمَا

Culimooy cilmigu waa qareen lagu qaboobaaye

Haddaad qurux u yeeshaan khalqigu kama qaraareene

Qasri buu idiin noqon lahaa laysku qoofalaye

١٧ -وَلَكِنْ أَذْلُوهُ فَهَانُوا وَدَنَسُوا *** مُحْيَاهُ بِالْأَطْمَاعِ حَتَّى تَجْهَمَا

Liidnimo markay qaayibeen lagu qasaaroowye

Qiilkana markuu qaad ku helay qaalligii dhimaye

١٨- فَإِنْ قُلْتَ جَدُّ الْعِلْمِ كَابٍ فَإِنَّمَا **كَبَا حِينَ لَمْ يَحْرَسْ حِمَاهُ وَأُسْلِمَا

Qabri buu cilmigu qaar la galay jooggi loo qodaye

Markii goodha loo waayey iyo qori ilaaleeya

Waa kaa qiyaamihi u dhacay Maxamed Qayrroow'e

١٩- وَمَا كُلُّ بَرَقٍ لَّا حَ لِي يَسْتَفْزِنِي ** وَلَا كُلُّ مَنْ فِي الْأَرْضِ أَرْضَاهُ مُنْعَمًا

Quruxdaa aduunyada wallee qaalin kama doono

Qof kastoon jalleecana qadhiidh uguma xiisoodo

٢٠- وَلَكِنْ إِذَا مَا اضْطَرَّنِي الضُّرُّ لَمْ أَبْتَ ** أَقْلَبُ فِكْرِي مُنْجِدًا ثُمَّ مُتَّهِمَا

Haddii aan qawado amase qado amase qaamoobo

Qandhadaa intaan qabo hal meel uma qayuubnaado

٢١- إِلَى أَنْ أَرَى مَا لَا أَعْصُ بِذِكْرِهِ ** إِذَا قُلْتُ قَدْ أَسَدَى إِلَيَّ وَأَنْعَمَا

Markaan helo midkii ii qalmee qarash Ilaah siiyey

Ruuxii qalbigu fiican yahay qawl ku celin maayo.

{من غض بصره نور الله بصيرته}

Isha laabe laabtaa ilays looga dhigayaaye
Laagaha firdawsaad ayaa lagu casuumaaye
Liibaanna wuu helahayaa labada daarroode
Laandheere aan kaa ahayn lamaba sheegayn.

{مصاحبة الفحول تُفَجِّل}

Foolaadka oon laga fogaan lagu fariidoow

رَأَيْتُ الذُّنُوبَ تَمِيتُ الْقُلُوبَ ۝ وَقَدْ يورث الذَّلَّ إِدْمَانُهَا

وَتَرَكْتُ الذُّنُوبَ حَيَاةُ الْقُلُوبِ ۝ وَخَيْرٌ لِنَفْسِكَ عَصِيَانُهَا

Macaasidu quluubtay dishaa waana loo marage
Marka aad ka durugtaa qalbigu malabsadaa khayre
Majaraha u qabo nolosha xumi malaha liibaane

"قال الإمام مالك "ما كان لله دام واتصل، وما كان لغير الله انقطع وانفصل

Dar Ilaahay camal loo qabtaa daa'imoo jira'e
Dana kale hadday soo galaan dabargo' weeyaan.

نَعِيبُ زَمَانَنَا وَالْعَيْبُ فِينَا ○ وَمَا لَزَمَانِنَا عَيْبٌ سِوَانَا
وَنَهْجُو ذَا الزَّمَانِ بِغَيْرِ ذَنْبٍ ○ وَلَوْ نَطَقَ الزَّمَانُ لَنَا هَجَانَا
وَلَيْسَ الذِّئْبُ يَأْكُلُ لَحْمَ ذِئْبٍ ○ وَيَأْكُلُ بَعْضُنَا بَعْضًا عَيَانَا
(الشافعي)

Wakhtigaynnu ceebaynaynaa camal xumaanteene
Carrab baan ku oolline runtii hadal ma ciileene
Caddaymuu inoo tirin lahaa lala cirroobaaye
Waraabuhu ma cuno hilib dhurwaa cayn kastuu yahaye
Cashiiriyo wuxuu kala yaqaan cadawga laayaaye
Innagana cid kii kuu xigaa laga cabsoodaaye
Caqliyoow ba' sawtaa dadkii talo ku ceeryoontay!

قلت للفقير: أين أنت مقيم** قال لي: في عمام الفقهاء
إن بيني وبينهم لإخاء** وعزير علي قطع ذاك الإخاء
Faakihaysi iyo la isku waa' fahanka diimeede
Faqri baad la noolaan ninkii fiqi hawaystoow

الجهل والأهل ساكنان في بلدٍ ** فاصبر عن الأهل أو فاصبر على الثاني

Ehelkiyo aqoon-yaridu waa ul iyo diirkeede

Ka ag durug dadkaagoo wax baro ama agnaanoow

"تجري الرياح بما لا تشتهي السفن"

Dabayluhuba doonyaha

Dhanka aanay doonayn

Saw uma duduucan!

يا طارق الباب رفقاَ حين تطرقة... فإنه لم يعد في الدار أصحابُ

تفرقوا في دروبِ الأرض وانتثروا.... كأنه لم يكن أنسٌ واحبابُ

ارحم يديك فما في الدار من أحد..... لا ترج رداً فأهل الودُ قد راحوا

ولترحم الدار .. لا توقظ مواجهها..... للدور روحٌ .. كما للناس أرواحُ

Ninka taagan kadinkee

Albaabada tumaayoow

Qun yar taabo saaxiib

Tolki way hayaameen

Way kala tageenoo

Tafaraaruq baa dhacay

Farahana tudhaalee

Cidi toosi maysee

Gurigana tahliil iyo

Tuf waraabin mayside

Tiiraanyo haw dilin!

"يوجد في النهر ما لا يوجد في البحر"¹⁵

Waxay baduhu diideen mar buu webi ku deeqaaye

Ardayguna mar buu daah-furaa xaajo dihinayde

Doog iyo mar baa laga helaa malabkii doocaan!¹⁶

"وَعَدُّنَا النَّبِيَّ مِنْ جَنْسِ الْبَشَرِ..... كَعَدُّنَا الْيَاقُوتَ مِنْ جَنْسِ الْحَجَرِ"

Nebigii dhambaalkiyo la yimi dhaxalka diinteenna

Sida dheemmantuu aadamaha uga dhex-muuqdaaye

¹⁵ – Kelmaddani waa kelmad caan ah oo culimadu adeegsadaan marka ardayga laga faa'ido wax aan sheekhiisu haynin, asalkeeduna waxa uu ahaa laba nin oo walaalo ahaa ayaa mid waxa uu qoray kitaab uu ugu magac daray البحر الرائق ka labaadna waxa uu qoray kitaab kale oo la dheho النهر الفائق labaduna waxay sharraxayaan kitaab la dheho كثر الدقائق, dabadeed fuqahadii Axnaaftu waxay odhan jireen mar baa webiga laga helaa wax aan badda laga helin, iyaga oo labadaa kitaab u dan leh.

¹⁶ – **Malabka doocaan** : waxaa loo adeegsadaa shayga qiimaha badan, asalkiisuna waa webi ku yaalla dalka Yaman oo malab wanaagsan oo adduunka ka sheeggan laga dhoofiyo, Soomaalida dhexdeedana caan buu ka ahaa muddo dheer, waxa la mid ah timirta doocaan oo Iyana suugaanta ku jirta.

إذا نحن قمنا للصلاة فإننا... نُهين عن الإتيان فيها بسة
بروكٍ بعيرٍ والتفات كثعلب... ونقر غراب في سجود الفريضة
واقعاء كلب أو كبسط ذراعه... وأذنان خيل عند فعل التحية

Salaadaha markaad fali sharciga waa la fuliyaaye
Inaan falalka qaar joojinnaa layna farayaaye
Fadhiga awrka iyo eeyga iyo fiiqsi shimbireedka
Sida farasku saymaha u lulo faraha taagtaagga
Lugo-fidinta faca habar-dugaag, fiirmo-dawaceedka
Ficilladan lixda ah maandhe waa laga fogaadaa

السيفُ أَصْدَقُ أَنْبَاءٍ مِنَ الْكُتُبِ... فِي حَدِّهِ الْحَدُّ بَيْنَ الْحَدِّ وَاللَّعِبِ
(أبو تمام)

Hubku wuxu ka hadal fiican yahay hurinta buugaage
Higgadiisa dhuuntaa dhabbaha lagu hagaagaaye
Taangiga ninkii ku hanjabaa lala heshiiaaye
Ninkaan holoca maadhiin lahayn lagama haybaysto!